



# Diiradda la saarayo: Faa'iidooyinka uurka

**Haddii aad tahay qof markii u horreysay waalid ah ama wax ku darayso qoyskaaga, CareOregon waxay halkan u joogtaa adiga.** Wuxuu weli daboolnaa daryeelka caafimaadka jirka, ilkaha iyo maskaxda iyo daaweynta isticmaalka mukhaadaraadka. Laakiin uurka iyo waalidnimadu waa kuwo gaar ah, markaa barnaamijkeena **CareBaby** wuxuu bixiyaa ilo dheeraad ah, sidoo kale.

## Bixiyayaashaada caafimaadka jirka

### Daryeelka uurku waxaa faa'iido la daboolo

waxaan ku jira daryeel loogu talagalay adiga iyo ilmahaaga ugu yaraan 12 bilood dhalashada ka dib.



Umulisooyinka



Dhakhaatiirta daawada qoyska



Dhakhaatiirta daryeelka hooyada  
uurka leh iyo nidaamka taranka (sida  
caadiga ah loo yaqaan OBGYNs)

## Taageerada bulshada

Marka laga reebo faa'iidooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) ay daboosho, **waxaanu kugu xiri karnaa ilo kale oo lacag la'aan ah:**



Taageerada cuntada: Caawimaada  
dalbashada loogu talagalay WIC



Fasallada dhalashada iyo  
ilmaha cusub ee dhashay



Taageerada quudinta ilmaha  
cusub ee dhashay



Adeegyada rabshadaha qoyska

## Siyaabo dheeraad ah oo caafimaad loogu sugnaado



**Waxaad aragtaa dhakhtar ilkood.** Daryeelka ilkuhu waa mid ammaan ah marka aad uurka leedahay, si buuxda loo daboolo, waana mid u wanaagsan adiga iyo ilmahaaga koraya. Arrimaha ilkaha qaarkood waxay halis galin karaan ilmahaaga taasi oo ah dhalashada waqtiga hore.



**Jooji sigaar cabida.** La hadal adeeg bixiyaha uurkaaga ama daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah si aad u bilawdo — helitaanka caawimaadu waa mid lacag la'aan ah. Wuxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Khadka Joojinta Tubaakada ee Oregon wixii la xiriira la talin lacag la'aan ah [quitnow.net/oregon](http://quitnow.net/oregon) ama 800-QUIT-NOW (800-784-8669).

## Faa'iidooyin dheeraad ah oo loogu talagalay xubnaha uurka leh



**Fiitamiinada mudada hore ee uurka la leeyahay**  
waa kuwo lacag la'aan ah oo leh daawooyinka la isku qoro oo ka socda adeeg bixiyahaaga.



**U waco doula.** Doula (oo ah wehelka waqtiga dhalashada oo tababarano) waxay kordhisaa fursada dhalasho caafimaad leh.



**Daryeelka arraga** Baaritaannada indhaha iyo muraayadaha indhaha waa kuwo si buuxda caymiskooda loo daboolay oo loogu talagalay xubnaha uurka leh.

Waxyabo dheeraad ah oo ku saabsan faa'iidooyinka uurka iyo adeegyada ka ogow [careoregon.org/carebaby](http://careoregon.org/carebaby). Haddii aad hayso su'aalo ama aad rabto in aad ku xiranto ilaha bulshada, naga soo wac 503-416-4100, khadka bilaashka ah 800-224-4840 ama TTY 711.

**Waxaan halkan u joognaa adiga  
yo ilmahaaga!**

## Faa'iidooyinkaaga caafimaadka waxaa bixiya CareOregon, qorshahaaga caafimaadka Medicaid. Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh xaqijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

## Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.

**Macula Caafimaadka Oregon (OHA)** ayaa gacanta ku haya barnaamija Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).

**Health Share of Oregon (HSO)** waa waxa loo yaqaano daryeelka urruradu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.

**CareOregon** waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya in ay bixiso daryeel. Wuxaan sidoo kale gacan ka geysanaa faa'iidooyinka daryeelka caafimaad iyo adeegyada ee loogu talagalay xubnaheena, sida daryeelka uurka.

**Bixiyayaashaada caafimaadka dhimirka iyo daaweyntaada isticmaalka mukhaadaraadka** ayaa isku duwa daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida bixiyayaasha caafimaadka jirka, kalkaalsooyinka sare, farmashiistayaasha iyo kuwo kale.

### CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):

- Daryeelka caafimaadka jirka
- Daryeelka caafimaadka dhimirka
- Daaweynta isticmaalka mukhaadaraadka
- Daryeelka ilkaha
- Medicare
- Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

### Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:

- Isku duwida daryeelka
- Farmashiyaha
- Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- Kala doorashada gaadiidka
- Adeegyada turjumaada luqadda
- ER & daryeelka degdega ah

[careoregon.org](http://careoregon.org)



### Su'aalah?

Ma jeclaan lahayd in aad waxyaabo badan ogaato?

**Kooxdeena Adeega Macmiilka ee waxtarka iyo saaxiibtinimada leh ka wac 800-224-4840** ama farriin ammaan ah noogu soo dir [careoregon.org/portal](http://careoregon.org/portal).

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa mid lacag la'aan ah. Wac 800-224-4840 ama TTY 711. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta.

